

Ku saabsan Ururukeena

Isbaheysiga Guri la'aanta ayaa hormuud u ahaa inay udoodaan dadka guri la'aanta ee Louisville tan iyo 1986, markii uu ururkani la aas aasay si loogu jawaab-celiyo arrinta sii kordheysa ee guri la'aanta.

Nala soo Xariir

Taleefan: (502) 636-9550


Qabso Sariir: (502) 637-BEDS

Boga: www.louhomeless.org

Cinwaanka: 1300 S 4th St. #250
Louisville, KY 40208

ILAALI DIIWAANKAAGA!

- Hubi inaad hayso diiwaanka WAX KASTA si aad ku ilaalo索 xuquuqda kirayste ahaan.
- Qor SAACADA,TAARIKHDA iyo Cidda aad la hadashay mar kasta oo aad la xiriirto mulkiilaha.
- Hubi inaad isticmaasho Boosta SHARCIYEESAN ama AAD GAYSO markaad warqad u dirayso mulkiilahaaga.



Macluumaaad Dheeraada


Haddii adiga ama qof aad taqaan uu u baahan
yahay ka caawin guri ka guurid,
la xidhiidh Legal Aid Society (LAS)
lambarkan (502) 584-1254

Legal Aid Society waxay bixisaa adeegyada
sharci bilaash kuwa u qalma.

Maadama buug-yarahani uusan daboolin
wax walba, waxay kaa caawin kartaa inaad
ogaato maxaa dhib kaaga iman kara hadhow.
Wixii macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan
sida loo ilaali naftaada kirayste ahaan, iskaan
karee QR code hoose si aad u aragto
"Buugga Xuquuqda Kiraystayaasha"



iskaan karee Buugga
Xuquuqda Kiraystayaasha



**Mulkiiluhu
ma kaa
HAGAAJIN
LAHAY?**

WAXYAABAHA MILKIILAHAAAGA LA RABO INUU SAMEEYO

- Ku sameeyo dib-u-dayactirnimo guriga. kuwaa heshiiska ku jira
- Ka dhig meelaha daarada NADIIF iyo AMAAN
- Bixi ADEEGYADA MUHIIMKA AH (sida LG&E, Biyaha, Biyaha Kulul, Kulayl inta u dhaxaysa Oktoobar iyo Maajo, iyo adeegyada kale ee muhiimka ah.)

* Adiga ayaa ka mas'uul ah bixinta lacagtaada biilasha tamarta, haddii aysan ku jirin kirada.

* Qaboojiyaha maaha wax lama huraan ah, laakiin haddii mulkiilahaagu ku siiyo waa inay si habسامي ah u shaqeeyaan.

MIYUU KAA JARTAY MULKIILAHAA ADEEGYADA MUHIIMKA AH?

- Warqad u dir mulkiilahaaga boosta SHARCIYEESAN, wac KORMEEERAHA GURIGA 574-3321, wac METROCALL 311.
- Haddii mulkiilahaagu diido inuu soo celiyo adeegga muhiimka ah, la xiriir Qareenka. Wac Gargaarka Sharciga (502)548-1254 ama Adeegga Gudbinta Qareenka Kentucky (502) 583-1801.

2 IKHTIYAAR HADDII MULKIILAHAAAGU UUSAN HAGAAJIN



Doorashada #1 - Warqadda 14/30

Waa maxay: Warqada 14/30 ayaa u sheegaysa mulkiilahaaga inay haystaan 14 MAALMOOD inay ku sameeyaan dayactirka lagama maarmaanka ah, ama heshiisku wuxuu dhamaan doonaa 30 maalmood gudahood.

Sidee: U dir warqad mulkiilahaaga qeexaysa dayactirka u baahan in la sameeyo. Warqadan sidoo kale waxay ku sheegaysaa in heshiisku ku dhamaanayo 30 maalmood ka dib helitaanka warqadda haddii dayactirka aan lagu dhamaystirin 14 maalmood gudahood

*** Haddii aad dooratay doorashadan tani waxay la macno tahay adiga guuri doonaa haddii aad go'aansato inaad joojiso heshiiska**

**ESPAÑOL
KISWAHILI
FRANÇAISE
SOMALI
TIẾNG VIỆT
العربية**



Doorashada #2 - Dayactirka & Ka-goynta

Waa maxay: Dayactirka & ka goynta waa marka aad sameyso dayactirka lagama maarmaanka ah oo aad ka jarto kharashka kiradaada.

Sidee: Warqad ugu dir mulkiilahaaga. Sheeg waxa u baahan dayactirka, oo kula tali inaad dhibaataku hagaajin doonto kharashkooda haddii aan dayactirka la samayn. Sii Mulkiilahaaga 14 MAALMOOD haddii aanay ahayn xaalad degdeg ah

* Marka shaqadu dhammaato u soo dir mulkiilahaaga qoraal qeexan oo ku saabsan shaqada dhammaatay ee aad bixisay. Waxaa laga yaabaa inaadan ka jarin kharashka shaqada ama kharashyada aadan bixin.

JOOJINTA KIIRADAADA SABABTOO AH MILKIILAHAAAGU WAXBA MA HAGAAJINAYO

Haddii aad isku dayayo inaad joojiso heshiiskaaga sababtoo ah mulkiilahaagu wuu ku guul daraystay inuu fuliyo waajibaadyada dayactirka, raadso caawimada qareenka amma wac Jurka Gargaarka Sharciga (LAS) lambarka (502) 584-1254. LAS ayaa kaala talin doonta haddii aad joojin karto heshiiskaaga sababta gaarka ah iyo sida habboon ee loo sameeyo. Waxaad sidoo kale tixraaci kartaa koodka QR ee Buugga Xuquuqda Kiraystaha si aad u hesho maclumaad dheeraad ah iyo agab ku saabsan mulkiilaha waajibaadka dayactirka